



# Codsasho ku saabsan dhigashada afka hooyo

## Macluumaad ku aaddan dhigashada afka hooyo

Haddii uu canuggaagu guriga uga hadlo af aan iswidhish ahayn wuxuu canuggu xaq u yeelan karaa in loo dhigo afkiisa hooyo. Waxay taasi khuseysaa laga billaabo fasalka 1-aad.

Carruurta ka tirsan mid ka mid ah dadka laga tirada badanyahay ee qaranku waxay heli karaan waxbarashada afka hooyo laga billaabo fasalka dugsiya xannaanada.

Wuxuu ilmahaagu xaq u yeelan karaa in afkiisa hooyo loogu dhigo iskoolka haddii:

- Mid ka mid ah ama labada waalidba ay leeyihiin af hooyo oo aan iswiidhish ahayn
- Aad luqadda maalin kasta guriga uga hadashaan
- Uu canuggu leeyahay aqoonta aasaasiga ah ee luqadda
- Ugu yaraan 5 arday ay maamulka dugsiyada hoose-dhexe ee Göteborg ka dalbadaan in loo dhigo isla halka luqad
- Uu jiro, ama la shaqaaleysiin karo macallin habboon

Tani xitaa waa ay khuseysaa luqadda dhagoolayaasha.

Haddii uu canuggaagu yahay ilmaha la korsado oo uu leeyahay af hooyo oo aan iswiidhish ahayn wuxuu canugga heli karaa in loo dhigo afka hooyo. Waxaa keliya oo shardi ah in ilmuhu leeyahay aqoonta aasaasiga ah ee luqadda, xitaa haddii aan afka maalin kasta guriga lagaga hadlin.

## Maxay ka dhigantahay aqoonta aasaasiga ahi?

Aqoonta aasaasiga ah ee afka hooyo waxay ka dhigantahay in ay khasab tahay inuu ardaygu awoodo inuu si firfircoon ula socdo waxa la dhigayo iyo inuu fahmayo qoraallada fudfudud. Waa inuu canuggu fahmaa tilmaamaha afka ah, uuna awoodo inuu ka qaybqaato wadhadallada ku saabsan mawduucyada fudud. Shuruudaha ku aaddan aqoonta aasaasiga ahi waa ay sii kordhayaan mar kasta oo urdaygu sii weynaadaba.

## Barashada afka hooyo ee luqadaha dadka laga tirada badanyahay ee qaranka

Ardayda ka tirsan mid ka mid ah dadka laga tirada badanyahay (Yuhuudda, Finlandeeska Iswidhishka, Tornedalanka, Samaha iyo Roomarku) xaqbey u leeyihiin in loo dhigo afka hooyo xitaa haddii aanad maalin kasta afka guriga uga hadlina. Ardaygu uma baahna inuu leeyahay aqoonta aasaasiga ah ee luqadda. Waxaa ku filan inuu ardaygu rabo in uu barto luqaddiisa dadka laga tirada badanyahay ee qaranka si uu maamulka dugsiyada hoose-dhexe ee Göteborg u siiyo waxbarashada afka hooyo. Waxaa waxbarashada la bixinayaa haddii aan haysanno, ama aan shaqaaleysiin karno, macallin habboon.

Barashada afka hooyo ee luqadaha dadka laga tirada badanyahay ee qaranka waxaa la bixi-nayaa laga billaabo fasalka dugsiga xannaanada.

Ardeyga Roomaha ah ee u soo guuray Iswiidhan wuxuu heli karaa in af hooyo ahaan loogu dhigo laba luqadood haddii ay jiraan sababo gaar ah.

## **Maamulaha ayaa go'aaminaya inuu ilmahaagu xaq u leeyahay waxbarashada afka hooyo iyo kale**

Waa maamulaha dugsiga ilmahaagu dhigto cidda go'aamineysa inuu ilmahaagu xaq u leeyahay waxbarashada afka hooyo iyo in kale. Ka taageero ahaan, wuxuu iskoolku isku dayi karyaa inuu ogaado inta uu ardaygu ka yaqaanno afka hooyo.

Dadka laga tirada badanyahay ee qaranku xaqbey had iyo jeer u leeyihiin in loo dhigo afka hooyo, laakiin sidaas oo ay tahay waxaa laga yaabaa inuu dugsigu u baahdo inuu ogaado waxa uu ardaygu ka yaqaanno afka hooyo.

Iskoolka ayaa kula soo xiriiraya marka go'aanka la gaaro.

## **Haddii aad su'aalo qabto**

La xidhiidh iskoolka canugga haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dhigashada afka hooyo ama aad u baahantahay in lagaa caawiyo buuxinta foomka codsiga.

# Codsiga

## Dir codsiga ama gey ilmahaaga iskoolkiisa.

Magaca canugga	Nambarrada aqoonsiga	
Cinwaanka waddada (cinwaanka uu canuggu ku qoranyahay)		
Nambarka boostada	Xaafadda boostada	
Iskoolka	Fasalka	
Magaca waalidka / God man	Nambarrada aqoonsiga	Telefoon
Cinwaanka e-mailka		
Magaca waalidka	Nambarrada aqoonsiga	Telefoon
Cinwaanka e-mailka		
<p>Doonaya dhigashada afka hooyo ee <b>luqadaha dadka laga tirada badanyahay ee qaranka</b> (Finlandees, Yiddish, Meenkieli, roomani jibsi, saame)</p> <p>Sheeg luqadda (nooca): _____</p> <p>Canuggaaga luqaddu ma ku cusubtahay?</p> <p>Haa</p> <p>Maya</p>		
<p>Doonaya dhigashada afka hooyo ee <b>luqad kale oo hooyo</b></p> <p>Sheeg luqadda: _____</p> <p>Canuggaagu ma leeyahay aqoonta aasaasiga ah ee luqadda?</p> <p>Haa</p> <p>Maya</p> <p>Ma leedahay waalid ay luqaddani afkiisa hooyo tahay?</p> <p>Haa</p> <p>Maya</p> <p>Canuggu waa mid la korsado</p> <p>Luqaddan guriga ma kula hadashiin canugga maalin walba?</p> <p>Haa</p> <p>Maya</p> <p>Canuggu waa mid la korsado</p>		

## Saxiixa waalidka/God man-ka ee codsiga afka hooyo ee canugga.

Taariikh (sanad-bil-maalin)	Saxiixa
Taariikh (sanad-bil-maalin)	Saxiixa

# Fylls i av skolan

## Beslut om undervisning i modersmål

En elev som har en vårdnadshavare med ett annat modersmål än svenska ska erbjudas modersmålsundervisning i detta språk om

1. språket är elevens dagliga umgängesspråk i hemmet, och
2. eleven har grundläggande kunskaper i språket.

En elev som tillhör någon av de nationella minoriteterna ska erbjudas modersmålsundervisning i elevens nationella minoritetsspråk.

Regeringen eller den myndighet som regeringen bestämmer får meddela föreskrifter om modersmålsundervisning. Sådana föreskrifter får innebära att modersmålsundervisning ska erbjudas i ett språk bara om ett visst antal elever önskar sådan undervisning i det språket (10 kap. 7 § respektive 11 kap. 10 § skollagen [2010:800]).

Eleven har rätt till modersmålsundervisning enligt skollag och skolförordning.

Eleven har INTE rätt till modersmålsundervisning enligt skollag och skolförordning.

Skäl för bedömningen att eleven inte har rätt till modersmålsundervisning.  
Motivera.

Beslutsfattare är rektor enligt 5 kap. 7 § skolförordningen. Enligt Grundskolenämndens delegationsordning 4.6.8 kan rektor överlåta beslutanderätten om modersmålsundervisning till annan. Beslutet ska ej meddelas till nämnden.

### Underskrift beslutsfattare

Datum (åååå-mm-dd)	Underskrift
--------------------	-------------